



Bar Ilmahaagu Inuu Dareenkiisa Turjumi karo: Fikraddo Qoysaska Lala Wadaagi Karo

Fasax ayaad u tahey in aad nuqul ka sameysatid qoraalkan, Maqaal ku darsatid, ama manshuuraadba.

Sheekooyinka Sidan Cusub u Isticmaal.

U akhri ilmahaaga buug ka sheekeynaya dad dareenkood (sida murugo, farxad, warwar, maangad iwm.). Joogso marka aad mareyso meel ka hadleysa qof dareenkii. Weydii ilmahaaga “Waxa uu u maleynayo in qofkaasi dareemayo?”, Sababta uu u dareemayo”, amaba, “Ku dheh eeg wajigiisa ama wajigeeda”, maxaad ku garan kartaa iney cadhooneyso, faraxsantahey ama ____?”, “Adigu waligaa sidaa ma dareentey?”. “Maxaad sidaa u dareentey?” oo “Kadibna maxaa dhacey?”, “Maxaad u maleyn iney aheyd iney dadkani u baahanyihiin iney sameeyaan marka ay sidan oo kale ay dareemayaan?”, In badan haku hakan hal bog, naaqishaada sheekadana wad inta uu ilmuhu xiiseynayo uun.

Ilmahaaga la Samee Buug ka Sheekeynaya Dareen.

Mashruuca uugu fudud ee aad ilmahaaga la sameyn kartaa waa buug aad guriga kula sameysid. Waxaad u baahan tahay oo kaliya waraaqo, qalimadda midabeeyaha ah iyo stapler. Buug dhan ayaad ka sameyn kartaa dareen kaliya, adoo ilmahaaga kala shaqeynaya, ayaad ka buuxin kartaa buuggaa waxayaabaha kaa dhiga inaad sidaa dareentid. Tusaale ahaan, “Buuga Faraxa” waxaad adiga iyo ilmahaagu ku sawirri kartaan waxyaabaha ilmaha ka dhiga mabsuud. Waxaa kale oo aad buug kale ka soo goosan kartaa sawirada ilmahaaga faraxa galiya oo aad buuggaagan ku xabkeyn kartaan. Waxa kale oo aad sameyn kartaan buug ka sheekeynaya dareeno kala duwan iyo erayada loo isticmaalo dareemadaa sida (farxad, cadho, fajac, cabsi, han-weyni iwm.) Caruuraha jecel iney aad uuga hadlaan dareenkooda, iyaga oo weedho ah ayaad bog uugu qori kartaa, kadibna la akhriyi kartaa. Weydii ilmaha in uu kalmadaha dareenka uu sawir ka turjumaya dareenkaa sawirada kaa tusi karo, ama sawiro dareenkaa ka turjumaya ka soo gooyo buug kale oo uu waafajiyo qoraalkaagii dareemada isaga oo ku xabkeynaya. Ogow, xarakaadkan waxa kaliya ee uu ilmuhu jeclaan karaa ama macno u sameyn karaa haddii oo kaliya oo aad la sameysid. Ilmuhu inuu kaligii sameeyaa aad ayey uugu adag tahey.

Ilmahaaga la Ciyaar Canjilaadda Wajiyada.

Ku bilow ciyaarta adigoo odhanaya, “Waxaan sameynayaa canjilaad waji, ee ma sheegi kartaa dareenka aan bixinayo marka aad wajigeeyga eegtid”. Markaa, samee waji farxadeed ama mid murugo. Marka ilmahaagu garto kalmada ka turjumeysa dareenka uu wajigaagu bixinayo, u jawaab ilmaha adiga oo ku leh “Waa sax”. “Miyaad garanaysaa waxa isiiya dareenka noocaas ah?” Dabeetana ku xigsii adiga oo si fudud dareeno uugu sharaxaya (sida., bisadaha qurxoon, ee yaryar ee dhogorta badan ee furfruran lihi wey iga farxiyaan, ma jecleysto marka uu roobku da’ayo, oo miidaanka dibada ma tagi karo). Fadlan ogow, ma haboona in caruurta lagala hadlo mishaaakilada iyo dareenkooda dadka waaweyn ku shuqulka leh (sida., “Marka aabaha ila soo hadli waayo, waan ka xumaadaa”). Ilmahaaga isna ku dheh samee waji canjilaadyo markiisa sida, “Waa markaagii, ee waji canjilaad samee anna waxaan kuu sheegi dareenka uu xambaarsanyahey wajigaasi.” Waxba malaha haddii uu ilmuhu adiga uun kugu daydo oo aanu wada sixin dareenadii aad rabtey inuu wajigiisa kuugu muujiyo. Tababarkani muddo ayuu caruurta caadi ahaan ku qaataa. Marka aad qiyaasto wajiga ilmahaagu ku canjilayo dareenkiisa, weydii waxa kadhiga in uu sidaa dareemo. Sidaa kolba midkiin canjilaada ha u sameeyo, ilaa iyo inta ilmuhu ka xiiso dhacayo.

Ilmahaaga la Ciyaar Muraayad Isku Eeg oo Ku Dheh “Eeg, Eeg, Muraayad, Muraayad, Maxaad Argtaa?”

Adigoo isticmaalaya muraayada gacanta ama kuwa gidaarka la sudhaba, ilmahaaga la ciyaar adigoo humaagiisa ama kaaga ka tusaya muraayadda. Wajigaaga ka muuji dareeno kala duwan sida farxad ama murugo oo ku dheh ilmahaaga tusaale ahaan waxaan arkaa aabe murugeysan ama hooyo faraxsan oo isoo eegeysa. Ku jeedso ilmahaaga oo ku dheh waa markaagii. Xasuusi ilmahu in uu yidhaahdo “muraayad, muraayad, maxaad aragtaa?” weydii ilmaha in uu sameeyo waji farxad ama murugo leh. Dabeetana ilmaha ka caawi in uu kula yidhaahdo dareenka wajigiisu gudbinayo sida “Waxaan arkaa Maxamed yare oo isoo eegaya” “Maxamed wuu faraxsanyahey”. Haddii aad aragtid ilmaha oo ku celcelinaya uun canjilaaddii wajigii uugu dambeeyey ee uu arkey ee aad markaas uun u sameysey hala yaabin waa wax ay caruurta sameyso’e. Uwad ilmaha ciyaartan ilaa inta uu ka xiiso dhacayo.



National Center for Pyramid Model Innovations | ChallengingBehavior.org

Se promueve la reproducción de este documento. No se necesita permiso para reproducirlo. Si se modifica o se usa en otro formato, sírvase citar la fuente original. Este es un producto del National Center for Pyramid Model Innovations y su publicación fue posible mediante el Acuerdo Cooperativo #H3268170003, que es financiado por el Departamento de Educación de los Estados Unidos, Oficina de Programas de Educación Especial. Sin embargo, esos contenidos no representan necesariamente la política del Departamento de Educación; por lo tanto, usted no debe suponer que tienen el respaldo del Gobierno Federal.